4.10.010-P Diiwaangelinta Qasabka ah Iyo Imaanshaha

(1) Dhammaan carruurta, illaamaa laga dhaafo, kuwaasoo da'dooda u dhaxeyso 7 iyo 18 sanno jir oo aanan dhammeysan fasalka 12aad ayaa waxaa looga baahanyahay inay si joogta ah uga qeybgalaan dugsiga dadweynaha waqti buuxo. (ORS 339.010)

(2) Qof walboo xakameeyo canug walba oo u dhaxeeyo da'aha 7 iyo 18 sanno kuwaas aan dhameystirin fasalka 12aad waxaa looga baahanyahay inay soo diraan oo ku joogteeyaan canuga waqtiga ka qeybgal buuxo oo dugsiga dadweynaha. (ORS 339.020)

(3) Carruurta laga dhaafo ka qeybgalka joogtada ah ee dugsiyada dadweynaha waa carruurta kuwaasoo:

(a) Si joogta ah uga qeybgalo dugsiga gaarka ah ama kaniisada;

(b) Muujiyaan inay leeyihiin aqoon u dhiganta koorsada waxbarashada 12-ka sanno ee dhammaatay;

(c) Ay tahay waxbarashada guriga;

(d) Laga reebo ka qeybgalka sida sharciga lagu sheegay;

(e) Ay jiraan 16 ama 17 sanno jir oo looga dhaafay sababtoo ah waxay:

(A) Shaqeeyaan waqti buuxo;

(B) Shaqeeyo waqtiga barkii oo dugsi ku jiro waqti barkii;

(C) Ka diiwaangashan kulliyada bulshada ama barnaamij kaloo waxbarashada gobolka ka diiwaangashan; ama

(D) Isqabo ama codsado xureynta sharciyeed. (ORS 339.030; OAR 581-021-0076)

(4) Markii la tixgelinayo codsiga ka dhaafida ka qeybgalka qasabka ah, maamulaha waa inuu sameeyaa wareysi uu ku jirayo, laakiin aan ku xadidneyn, raacida:

(a) Ka qeybgalka canuga iyo waalidka ama masuulka sharciga ama canuga yar ee la xureeyay;

(b) Ka qeybgalka la taliyaha dugsiga ama maamulaha dugsiga;

(c) Tixgelinta sababaha codsiga;

(d) Dib u eegida warbixinta xigta ee ku saabsan canuga ama canuga yar ee la xureeyay:

(A) Buundooyinka qalin jabinta;

(B) Buundooyinka;

4.10.010-P Diiwaangelinta Qasabka ah Iyo Imaanshaha

(C) Barnaamijyada ku aadan daboolida sharuudaha Barashada Koowaad iyo Shahaadada Barashada Hormarsan iyo heerarka caadiga ah ee gobolka iyo degmada deegaanka oo waxqabadyada;

(D) Xaalada naafonimada hadda, haddii ay quseyso;

(E) Xaalada naafonimada hore, haddii ay quseyso;

(F) Natiijooyinka degmada iyo qiimeynada gobolka, oo ay ku jiraan hormarka lagu daboolayo heerarka gobolkoo dhan;

(G) Qiimeynta macalinka;

(H) Qiimeynta la taliyaha;

(I) Qorshooyinka degdega ah;

(J) Warbixinta kaloo quseyso.

(5) Haddii maamulaha uu ku taliyo in ka dhaafida ka qeybgalka qasabka ah la bixiyaa, diiwaanka iyo talladiisa/talladeeda waa in loo gudbiyaa maamulaha masuulka ka ah waxbarashada kale. Maamulaha waa inuu dib u eegaa tallada oo uu u gudbiyaa taladiisa/taladeeda oo kormeerayaasha guud ama ansixinta wakiilka. Haddii ka dhaafida la bixiyaa, maamulaha waa inuu ku siiyaa kuwa xiggo canuga iyo waalidka ama masuulka sharciga ah qoraal ahaan:

(a) Sharaxaada barnaamij walboo kale ee waxbarashada ama waxbarashada lagu daray la talinta ku haboon oo ay heli karaan ardayda sida lagu sheegay ORS 339.250(10) iyo (11);

(b) Ogeysiinta in: (1) ka dhaafida waxaa la bixiyaa waqti xadidan; (2) Ka dhaafida waa in dib loo cusbooneysiiyaa si sannadle ah; iyo (3) ka dhaafida waxaa dib ugu eegayo degmada taariiqda qaar;

(c) Ogeysiin in waalidka/ardayga ay tahay inuu dib u codsado ka dhaafida taariiq gaar ah ama ardayga waa inuu ku soo laabtaa dugsiga illaamaa isaga/iyada ay ka helaan dibloomada dugsiga sare, GED ama da'da 18 sanno jirka.

Tixraacyada Sharciga: ORS 339.010; ORS 339.020; ORS 339.030; ORS 339.250; OAR 581-021-0076

Taariikhda: Waxaa la qaatay 6/71; La badelay 9/73; La badelay 5/24/90; La badelay 12/21/91; La badelay 11.20/92; La badelay 9/9/02; BA 2420